U DIYAAR GAROWGA DHIBAATADA:

Xaaladaha degdega ee Waaladiinta iyo Dugsiga



Badqabka iyo amniga ardaydeena iyo shaqaalaha waa mudnaanta ugu sareyso ee Dugsiyada Dadweynaha Richmond.

rvaschools.net

RPS
RICHMOND
PUBLIC SCHOOLS

Tusmooyinka

U diyaar garowga Dhibaatada: Xaaladaha degdega ee Waaladiinta iyo Dugsiga

3 | Hordhaca

3 | Waa maxay Xaalad degdeg ah?

U diyaar garowga

4 | Waxa Aheyd in Waaladiinta Sameeyaan si ay Ugu Diyaar garoobaan Xaalada degdega ah?

5 | Waxa Dugsiyada Sameynayaan ee Dhacdada Xaalada degdega?

6 | Tallaabooyinka Illaalada ee Laga Yaabo Dugsiga in Dugsiga inay Isticmaalaan

8 | Waxa Laga yaabo waxa Waalidiinta laga yaabo Inay Sameeyaan Haddii ay Dhacdo Xaalad degdeg ah?

Xiriirada Xaalada degdega

10 | Sida Waaladiinta loo Ogeysiinayo Haddii ay Dhacdooyin ka Dhacaan Dugsiga?

10 | Soo kabsiga Masiibo Kadib

11 | Wixii warbixinta Dheeraad ah

11 | Kaarka Xiriirka Xaalada degdega ee Waalidka

U DIYAAR GAROWGA DHIBAATADA:
XAALADAHA DEGDEGA EE WAALADIINTA IYO DUGSIGA

Hordhaca

Badqabka iyo amniga ardaydeena iyo shaqaalaha waa mudnaanta ugu sareyso ee Dugsiyada Dadweynaha Richmond (RPS). Buug-yarahaan wuxuu sharaxayaa qaar ka mid ah habraacyada la qorsheeyay oo loogu dhaqmo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ee dugsiga canugaaga.

Maamulayaasha dugsiga waxay si dhow ula shaqeeyaan booliska, dabka, adeegyada gurmadka iyo hay'adaha caafimaadka dadweynaha si loo hubiyo hab dhaqano ku haboon iyo dugsiyadoo dhan ay u diyaarsanyihiin xaaladaha degdega ah. Shaqaalaha ugu muhiimsan waxay ku tababaranyihiin habraacyada Nidaamka Maareynta Dhacdada Qaranka. Waan u diyaarsannahay inaan la shaqeyno ka jawaabayaasha xaalada degdega ah haddii ay dhacdo halis ah ka dhacdo mid ka mid ah dugsiyadeena.

Qorshaheena dhameystiran ee degdega ah wuxuu wax ka qabtaa noocyo badan oo dhacdooyinka dhici kara, ma ahan sababtoo ah inaan filaneyno inay dhacayaan, laakiin sababtoo ah waxaan rabnaa inaan u diyaargarowno haddii ay dhacaan. Sababaha amniga darteed, sharaxaado gaar ah ayaanan laga yaabin in loo diyaariyo dadweynaha; si kastaba, waaladiinta iyo ardayda waxay leeyihiin door muhiim ah oo waa muhiim ah inaad garaneysid waxa la sameeyo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Fadlan dib u eeg warbixinta ku jirto buug-yaraha si aad u hubisid in adiga iyo canugaagaba aad fahamtaan habraacyada xaalada degdega.

Waa maxay Xaalada degdega ah?

Xaalada degdega ah waa dhacdo walboo aan la filaneyn oo sida suurtogalka ah ay halis geliso badqabka arday ama shaqaale walba. Waxay noqon kartaa wax walba laga bilaabo joogsiga adeegyada ee la xiriiro howlaha argagaxisada oo waxay saameyn kartaa hal canug, hal dugsi, ama dugsiga degmada oo dhan. Saraakiisha dugsiga, iyo mararka qaar ka jawaabayaasha xaaladaha degdega ah, ayaa qiimeynayo sida halis u tahay xaalad walba oo go'aansado tallaabada ugu wanaagsan oo si degdeg ah looga jawaabo, oo badqab iyo ku haboon. Qorsheynta hore iyo diyaarsanaanta ayaa yaeyn karto halisaha xaalad walboo halis ah. Qoraaladaan waxay bixiyaan tilmaamo diyaarsanaanta ah, waxa waaladiinta ah inay sameeyaan, iyo waxa dugsiga sameynayo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Habraacyada isgaarsiinta iyo habraacyada heshiiska ardayga ayaa sidoo kale la tilmaamay.

U DIYAAR GAROWGA

Waxa Aheyd in Waaladiinta Sameeyaan si ay Ugu Diyaar garoobaan Xaalada degdega ah?

Waaladiinta waxay leeyihiin door muhiim ah oo loogu diyaarinayo carruurtooda xaaladaha degdega. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah qaababka aad ku caawin kartid iyaga inay fahmaan in haddii xaalad degdeg ah ka dhacda dugsiga, macalimiinta iyo saraakiisha dugsiga waxay u tababaranyihiin inay qaabilaan xaalada. Kalsooni ku siiyo inuu dugsiga kula soo xiriirayo oo dib aad ula midoobeysid iyaga sida ugu dhaqsiha badan oo ay badqab u tahay in la sameeyo sidaas.

- Hubi in warbixinta xiriirka xaalada degdega ah ay hadda tahay oo saxantahay. La xiriir xafiiska hore ee dugsiga islamarkiiba marwalba oo ciwaankaaga ama lambarada shaqada, guriga ama mobeelka isbadelo.

- Ogeysii kaalisada dugsiga xaalado walboo caafimaad ama xadeynada jireed ee laga yaabo in canugaaga qabo ama daawooyinka laga yaabo in canugaaga qaadanayo. Sii saadadka caafimaadka lagama maarmaanka ah iyo daawooyinka isticmaalka maalinlaha iyo saadka dheeraadka ah ee ku qaato canugaaga xaalada degdega ah. Haddii ay jiraan su'aalo ku saabsan cadadka ku haboon ee daawada ama saadadka, fadlan la tasho bixiyaha caafimaadka canugaaga.

- Aqoonso cida loo ogolyahay inuu soo qaado canugaaga haddii aysan kuu suurtogaleynin inaad ka jawaabtid. Hubi in warbixinta xiriirkooda uu kan hadda yahay oo saxanyahay, oo feelka dugsigaaga ku jiro. Fadlan faham in canugaaga kaliya loo fasaxayo waaladiinta iyo dadka lagu aqoonsaday liiska xiriirka xaalada degdega ah. Kala hadal warbixintaan canugaaga.

- Hubi in canugaaga garanayo magaca waalidkooda ama daryeelahooda, ciwaanka iyo lambarada taleefonka. Haddii uu jiro kaliya hal waalid ama daryeele, canugaaga waa inuu haystaa warbixinta xiriirka oo qof labaad oo masuulka ah.

- Kala hadal canugaaga muhiimada inuu is dajiyo oo raaco tilmaamaha haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Haddii xaalad degdeg ah dhacdo inta ay joogaan dugsiga, macalinkooda wuxuu siinayaa iyaga tilmaamaha iyo warbixinta.

- Ogeysii canugaaga inay u wareegi karaan goob kale illaa aad ka soo qaadi kartid. U sharax erayga "qiimeynta" si markaas aysan u cabsoon in laga guuriyay dugsigooda. Qeexitaanka fudud ee qiimeynta waa nidaamka ka wareejinta dadka meel ka baxsan meesha ay joogaan ee halista ka jirto oo meel kaloo badqab ah.

- U sharax in mobeelada aan la isticmaalin inta lagu jiro xaalada degdega ah illaamaa uu sidaas u sheego macalinka. Ka jawaabayaasha xaalada degdega ah waxay ku xirnaaneysaa mobeelada oo isgaarsiin ahaan ah. Haddii ardayda iyo waaladiinta ay isku dayayaan inay isla xiriiraan, wareegyada taleefonka ayaa buux dhaafi karo, kaas oo carqaladeeyo awooda shaqaalaha xaalada degdega ah ay ku sheegaan warbixinta muhiimka ah.

- Marwalboo aad joogtid dhulalka dugsiga, ka feejignaw howsha gudaha iyo dibada dugsiga. U soo sheeg howl walboo laga shakiyo maamulka dugsiga si markaas ay u baaraan.

- Aasaas qorshaha diyaarsanaanta qoyska oo ay ku jiraan qorshaha isgaarsiinada. Tan waxay kuu suurtogelineysaa inaad la xiriirtid dhammaan xubnaha qoyska inta lagu jiro xaalada degdega ah.

- Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah oo canugaaga uusan aadi karin gurigooda, hubi inay jirto meel kale oo isaga ama iyada aadi karaan oo badqab ku ahaan karaan iyagoo sugayo xubin qoyska ah inuu qaado.

Waxa Dugsiyada Sameynayaan ee Dhacdada Xaalada degdega?

Waxa aan ku sameyno xaalada degdega ah waxay ku xirantahay xaalada iyo gaararka dhacdada. Waxaan isku dayeynaa isku day walba oo aan ku hubino in waxbarashada ay sii socoto, xittaa markii ay lagama maarmaan noqoto in la xiro dugsiga. Waxay ku xirantahay darnaanta halista ama xaalada degdega ah, tallaabooyin dheeraad ah ayaa la qaadi karaa, oo ay ku jiraan meel ku hooyashada, ka bixinta ardayda dhismaha ama xirida dugsiga xili hore.

Haddii ka jawaabayaasha xaalada degdega ah laga waco goobta, waxaan kula shaqeyneynaa amar mideysan oo lagu go'aansanayo qorshaha la hirgelinayo. Qorshooyinka xaalada degdega ah ee dugsiga way ku kala duwanyihiin dugsig ku dugsi, sida ku saleysan cabirka dugsiga, qaabka dhismaha iyo arimaha kale ee quseeyo, oo waxaa lagu bilaabaa sida ku xiran dhacdooyinka dhacayo waqtiga dhacdada. Iyadoo uu dugsi walba aasaasay qorshooyin tallaabo, goobaha samata bixinta, iyo qorshooyinka mideynta qoyska, qorshooyinkaan waa inay u dabacsanaadaan sida xaaladaha isu badelaan. Waaladiinta waxaa la ogeysiinayaa sida ugu dhaqsiha badan ee aan sameyno wax walba ee aan awoodno si aan u hubino badqabka ardayda iyo markii ay suurtogal noqoto si ay u bixiso warbixin saxan oo waxtar leh.

U DIYAAR GAROWGA

Tallaabooyinka Illaalada ee Laga Yaabo Dugsiga in Dugsiga inay Isticmaalaan

Dugsi walba wuxuu leeyahay qorshaha ddiyaargarowga xaalada degdega ah ee ku lugleh inta tallaabo ee suurtogalka ah. Jawaabta way ka duwantahay, waxay ku xirantahay sharuudaha iyo xaalada, oo waxaa go'aansado kooxda maareynta dhibaatada ee u tababaran inay gaaraan go'aano noocaas ah. Muhiim ayay u tahay waaladiinta inay fahmaan in haddii ay dhacdo halis ah dhacdo, ardayda waxaa loo fasaxayaa waalidkooda kaliya markii ay halista dhaafto. Dugsiyada waxay isticmaali karaan tallaabooyinka xigga ee illaalada:

- **Bandow.** Bandowga waxaa loo adeegsan karaa sababtoo ah dhacdo gudaha ah dhismaha ama sababtoo ah wax ka dhacayo dibada iyo booliska oo go'aansaday inay fiicantahay in la hubiyo in dugsiga illaalsanyahay. Ujeedka bandowga waa xadeynta dhaqaaqa shaqaalaha iyo ardayda, iyo in si buuxdo loo illaaliyo dhismaha.

  Inta lagu jiro bandowga, dhammaan albaabada gudaha iyo dibada way xiranyihiin. Ma jiro qof loo ogolyahay inuu galo ama ka baxo dhismaha illaa saraakiisha dugsiga, inta badan iyadoo si wadajir ah loola shaqeynayaan booliska, ayaa go'aansato inay badqab u tahay in sidaas la sameeyo. Dhammaan shaqaalaha, ardayda iyo martida lala xisaabtamayaa iyo waxbarashada way sii soconeysaa. Baaxada muddada bandowga waxay ku saleysantahay xaalad gaar ah, oo waxay noqon kartaa dhoor daqiiqo ama saacadood. Waa suurtogal in bandwoga uu ku lug yeelani karo haynta ardayda wax dhaafsan maalinta dugsiga caadiga ah. Marnaba ma ahan ujeedkeena inaan u hayno ardayda si aan lagama maarmaan aheyn, oo ma sidaas ma sameyneyno aan ka aheyn hubinta badqabkooda.

  Xaaladaha waxay ku soo laabanayaan si caadi ah sida ugu dhaqsiha badan oo ay badqab tahay in sidaas la sameeyo. Waaladiinta waxaa laga yaabaa in la ogeysiiyo ama aan la ogeysiin markii dugsiga bandow galo. Waxaa jiro waqtiyo mar dugsiga u galo bandow layliyo ama tababaro, ama dhacdo dibada ah oo aan ku lug laheyn dugsiga. Maamulaha dugsiga iyo Agaasimaha Badqabka iyo Amniga ayaa go'aansanayo markii dhacdo ay si weyn ugu fillantahay in la ogeysiiyo waaladiinta.

- **Hoy Meeleysan.** Tallaabadaan badqabka ah waxaa la tixgeliyaa markii ay xaalad ka dhacdo meel ka baxsan dugsiga oo saraakiisha go'aamiyaan xaalada tallaabada ugu badqabsan inay tahay in lagu hayo ardayda iyo shaqaalaha gudaha dugsiga illaa dhacdada dibada ah la xaliyo. Tusaalooyinka qaar waxay noqon kartaa xaalada cimilada, siideynta walxaha halista ah, ama xaalada ka dhacayo bulshada oo carruurta ah inaan la fasaxin. Ardayda banaanka jirto waxaa la gelinayaa gudaha, oo ay ku jiraan ardayda ku jirto fasalada gudaha ama wadada. Haddii hoyga meeleynta lagu dhawaaqo waxaa laga yaabaa inay dhaafto maalinta dugsiga, waaladiinta waxaa loo sheegayaa sida ugu siha badan ee suurtogalka ah.

U DIYAAR GAROWGA

- **Samatabixinta.** Haddii aysan badqab u aheyn ardayda iyo shaqaalaha inay joogaan gudaha dhismaha, dugsiga waa la samatabixinayaa. Ardayda iyo shaqaalaha waxay joogi karaan dhulalka dugsiga illaamaa dhismaha uu badqab yahay in dib loo galo ama dib loo dajiyo meel badqab ah ee dhismaha dugsiga ka baxsan, waxay ku xirantahay kala duwanaanshaha xaaladaha. Haddii ay hdacdo xaalada ka samatabixinta machadka, maamulayaasha dugsiga ayaa la shaqeynayo saraakiisha xaalada degdega iyo Waaxda Gaadiidka ee geynayo ardayda meel badqab ah. Meeshaas kadib ardayda waxaa midkood loo qaadayaa guriga ama sugayaan xubnaha qoyska inuu ka soo qaado goobta mideynta. Dhacdo walba, maamulaha dugsiga iyo Agaasimaha Isgaarsiinada ayaa hubinayo in waaladiinta la ogeysiiyo.

- **Xiritaanka Dugsiga Xaalada degdega.** Habraacaan wuxuu dhacayaa markii maamulayaasha dugsiga ay go'aansadaan in ardayga uu badqab ku yahay guriga badelkii dugsiga. Tan ayaa badanaa u dhacdo xaalada la xiriirto luminta adeegyada ama xaaladaha degdega ah ee cimilada. Waaladiinta waa la ogeysiinayaa in dugsiga (dugsiyada) ay xirmayaan. Sida waafaqsan xaaladaha caadiga ah, ardayda oo caadi ahaan u raaco baska waxaa la geynayaa guriga iyo waaladiinta waa la ogeysiinayaa.

- **Mideynta Qoyska ee Goobta ka Baxsan.** Ardayda waa laga dhaqaajiyaa goobta markii saraakiisha dugsiga go’aansato in ardayda iyo shaqaalaha aysan gelin qeybta dhismaha illaa laga dhigayo badqab. Dhoor goobo ee goobta ka baxsan ayaa la go'aansadaa xili hore, laakin lalama wadaago waalidka illaa dhacdada ka dhamaato. Booliska iyo saraakiisha dugsiga ayaa doorto goobta mideynta ugu fiican waqtiga dhacdada waxay ku xirantahay xaaladaha xaalada degdega. Waaladiinta waa la ogeysiinayaa goobta mideynta qoyska sida ugu dhaqsiha badan ee ay ku haboonaato in sidaas la sameeyo. Mudnaanadeena ugu muhiimsan ee samatabixinta goobta ka baxsan waa badqabka ardayga iyo la xisaabtanka. Waxaan rabnaa inaan hubino in ardayda loo fasaxo shaqsiyaadka loo ogolaaday iyo habraaca bixitaanka waa la bilaabayaa.

Haddii ay dhacdo samatabixinta dugsiga goobta ka baxsan, waaladiinta waxaa la siinayaa warbixin sida meesha goobta mideynta ay ku taalo. Waaladiinta ama dadka weyn ee loo ogolaaday waxaa looga baahanayaa inay tusiyaan aqoonsiga sawirka si markaas ay u qaadaan canuga. Nidaamka wuxuu qaadan karaa waqti yar sababtoo ah waxaan rabnaa inaan hubino in mideynta lagu sameeyo shaqsiyaadka loo ogolaaday.

U DIYAAR GAROWGA

Waxa Laga yaabo waxa Waalidiinta laga yaabo Inay Sameeyaan Haddii ay Dhacdo Xaalad degdeg ah?

Jawaabaha waalidnimada ugu waxtarka badan ee xaalada degdega ah ee dugsiga waa is dajinta iyo sugitaanka warbixinta saxda ah ee loo soo dirayo lambarka ku qoran xiriirka xaalada degdega ee canugaaga iyadoo la la isticmaalayo Nidaamka Fariimeysiga Xasuusinta (www.rvaschools.net/remind). Waan fahamsannahay inay u tahay dareen dabiici ah waaladiinta inay rabaan inay u soo degdegaan canugooda. Muhiim ayay kuu tahay inaad fahamtid in, inta lagu jiro dhacdo noocaas ah, dugsiyada gaarka ah iyo ka jawaabayaasha xaaladaha degdega waxay sameeyeen diyaargarow lagu xaliyo dhacdooyikaan. Wada shaqeyntaada ee xaaladaha degdega ah muhiim ayay u tahay badqabka iyo xalinta degdega ah ee dhacdada.

- Fadlan ha soo wicii dugsiga. Waa muhiim in qadadka taleefonada furnaadaan si markaas saraakiisha dugsiga ay u soo sameeyaan wacitaanada xaalada degdega. Haddii ardayda ay jiradaan ama dhaawacmaan, waaladiinta ardayda ayaa la ogeysiinayaa marka koowaad.

- Fadlan ha aadin dugsiga. Maadaama aan ka ogaanay xaaladaha degdega ah ee la soo dhaafay, mid ka mid ah caqabadaheena ugu weyn waa sida loo maareeyo dad badan oo waaladiin ah iyo muwaadaniinta walaacsan ee ku soo degdegayo goobta “caawin.” Sameynta sidaas, waaladiinta waxay si bareer ah u sameynayaan mashquul baabuur oo ka xiri karto jawaabayaasha inay imaadaan goobta ama ka tagaan, haddii ay lagama maarmaan noqoto, u qaadista shaqaalaha dhaawacmay ama ardayda xarumaha caafimaadka xaaladaha degdega ah.

- Is daji, raac habraacyada, oo la shaqey dugsiga iyo saraakiisha badqabka dadweynaha.

- U dhawow taleefonka kugu qoran sida lambarka xiriirka xaalada degdega.

- Hel warbixinta hadda ee ku saabsan dhacdada ee websaydka degmada ee www.rvaschools.net.

U DIYAAR GAROWGA

- Faham in habraacyada qaadista xaalada degdega ah ay ka duwantahay habraacyada qaadida wadada. Haddii ay dhacdo in lagu soo ogeysiiyo inaad ka qaadatid canugaaga dugsiga ama goobta mideynta qoyska loogu tallogalay, la imaw kaarka aqoonsiga sawirka. Haddii ay tahay inaad qof soo dirtid inuu soo qaado canugaaga,hubi inuu yahay qof ku qoran diiwaanada dugsiga sida shaqsi loo ogolaaday oo ay haystaan aqoonsiga sawirka. Canugaaga looma fasaxayo qof aan loo ansixin ama aanan bixin karin aqoonsi ku haboon.

- Raac habraacyada xaalada degdega. Haddii lagu weydiiyo inaad soo qaadid canugaaga, waxaa lagu weydiinayaa inaad raacdid habraaca bixitaanka ee loo sameeyay xaaladaha degdega. Nidaamka mideynta waxaa loo sameeyay in lagu hubiyo badqabka ardaydoo dhan oo waa muhiim in habraaca la raaco.

- Joog goobaha loogu tallogalay ee goobta mideynta qoyska.

- Dulqaad lahaw. Waa muhiim in loo sameeyo habraaca mideynta qoyska qaab nidaamsan si markaas aan u illaalino oo aan ula xisaabtanno ardaydeenoo dhan.

ISGAARSIINTA XAALADA DEGDEGA

Sida Waaladiinta loo Ogeysiinayo Haddii ay Dhacdooyin ka Dhacaan?

Mudnaanteena koowaad ayaa ah hubinta in ardaydoo dhan ay badqab tahay, lala xisaabtamo, oo ku jiro kormeerid qof weyn. Sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah in sidaas lagu sameeyo, Agaasimaha Isgaarsiinta ayaa u soo sheegayo warbixinta waaladiinta iyo bulshada. Dugsiga degmada wuxuu leeyahay warbaahin kala duwan oo loo heli karo waaladiinta taas oo loo cusbooneysiinayo, sida loogu baahanyahay, oo leh warbixinta ugu dhameystiran oo ugu saxan ee la heli karo.

1. Websaydka RPS (www.rvaschools.net)
2. Xasuusi Digniinada Fariin Qoraalka (isgaarsiinta mobeelka tooska ah ee qeybta iyo heerka dugsiga)

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg oo weyn, waaladiinta waxaa lagu dhiirogelinayaa inay daartaan janaalada talefishinka deegaanka xiggo sida illo dheeraad ah oo aqbaaraha:

- Channel 6 – CBS
- Channel 8 – ABC
- Channel 12 – NBC

Fadlan ogow iyadoo janaalada telefishinka ujeedkiisa yahay inay wargeliyaan warbixinta hadda ee ugu dambeyso, ma damaanad qaadi karno inay u soo sheegayaan sharaxaadahoo dhan si sax, iyo waaladiinta/ daryeelayaasha waa inay marka koowaad hubiyaan boggaga rasmiga ah ee RPS ee kor lagu sheegay.

Soo kabsiga Masiibo Kadib

Saraakiisha dugsiga way fahamsanyihiin in dhacdo naxdin ah ee dugsiga ama bulshada ah ay ku yeelan karto saameyn dareen shaqaalaha iyo ardayda. RPS waxay leedahay koox tababaran oo la taliyayaal ah, shaqaalaha bulshada, iyo cilmi nafsiilayaal ee ka jawaabi karo dugsiga inta lagu jiro iyo kadib dhacdada muhiimka ah si ay caawin u siiyaan. Haddii ay jirto fursad ah dhacdada xun ku sameyso saameyn dareen shaqaalaha ama ardayda, kooxda waxqabadka RPS ayaa ka caawiyo kuwa ay saameysay inay ka soo kabtaan dhacdada kadib.

ISGAARSIINTA XAALADA DEGDEGA

Wixii Warbixin Dheeraad ah

- Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Qorshaha Badqabka iyo Masiibada RPS, kala xoo xiriir Monica Fecht mfecht@rvaschools.net.
- Booqo www.rvaschools.net/schools-office/safety-and-security
- Wixii warbixin ah ee ku saabsan Qorshaha Badqabka iyo Masiibada ee dugsiga canugaaga, la soo xiriir maamulaha dugsiga.
- U tixraac websaydkaan illaha diyaarsanaanta xaalada degdega: www.ready.gov.

Kaarka Xiriirka Xaalada Degdega ah

Oo ku haboonaantaada ah. Fadlan daabac oo isku laab kaarka boorsada oo isticmaalka xaalada degdega ah.



RPS

RICHMOND

PUBLIC SCHOOLS

rvaschools.net